

Jeermiska qaaxadu ma mid aan markasta ku xanuunsan karaa?

Jeermiska qaaxadu wuxuu ku noolaan karaa jidhkaaga adigoo wax xanuun ah aan dareemayn. Jidhkaaga ayaa samaysanaya derbi uu isga celiyo jeermiska qaaxada kaasoo kaa hayn doona wixii xanuun ah ee qaaxada ku saabsan, waxaana loo yaqaan **jeermiska qaaxada qarsoon (LTBI)**.

Jeermiska qaaxadu wax dhibaato ah kuuma geysanayo, waa jeermis hurda ama jiifa ilaa iyo inta uu jirkaagu la dagaalamikaro. Marka aad qaadato dawada **LTBI** ma qaadiin kartid qaaxada dadka kale ama ma fidin kartid cudurka.

Hadii uu jirkaagu joojiyo la dagaalanka jeermiska qaaxada, way soo kici kartaa qaaxadii jiiiftay waxayna noqonaysaa cudurka qaaxada oo firfircaon ama nool, wayna balaaran kartaa. **Waxayna ku dhicikartaa qofkasta oo qaba qaaxada qarsoon ama LTBI.** Marka uu jeermisku kaco uuna fido waxaa loo yaqaan jeermiska qaaxada firfircoon. Dadka qaba qaaxada jeermiskeedu firfircoon yahay aad ayay u xanuunsan karaan weyna u gudbin karaan xanuunka dadka kale.

Sidee ayaan uga hor tegi karaa qaaxada firfircoon?

Waxaa jira daawooyin la qaato si aad uga hortagto qaaxada firfircoon. Isoniazid (**INH**) ayaa ah daawada loo qaato ka hortaga qaaxada **LTBI**. **INH** waxay dishaa jeermiska qaaxada jiiifta ka hor inta aysan u helin fursad ay xanuun kuu keento. Sababta oo ah jeermiska qaaxadu aad ayuu u xoog badan yahay, waxay qaadataa bilo badan si loo dilo jeermiska qaaxada.

Imisa jeer ayaan qaadanayaa daawada INH?

INH waxay waxtar leedahay markii la qaato maalin kasta wakhti isku mid ah ilaa iyo inta uu dhakhtarkaagu ku dhaho jooji. Qaado **INH** calooshaada oo maran ama intadan cuno cunin, hadii calooshu kugu xanuunto qaado dawada kadib markaad cunto cuno fudud.

Maxaan daawo u qaadan Hadii aan jiro Ihayn?

Daawada **INH** waxay dishaa jeermiska jirkaaga ku jira ee jiifa inta uu soo kicin jirana uu kuu keenin. Xusuuso jeermiska qaaxada waxaa fudud in la dilo inta uu hurdo ama jiifo.

Maxaan daawo u qaadan Hadii aan jiro Ihayn?

Daawada **INH** waxay dishaa jeermiska jirkaaga ku jira ee jiifa inta uu soo kicin jirana uu kuu keenin. Xusuuso jeermiska qaaxada waxaa fudud in la dilo inta uu hurdo ama jiifo.

Maxan ka ogaan karaa daawada LTBI?

Dad badan ayaa qaata **INH** maalin kasta iyadoo wax dhibaato ah ay arkin, laakiin **waxaa jira waxyaabo loo baahan yahay inaad ogaato: Hadii aad qabto dhibaatooyinkan lasoo xariir dhakhtarkaaga si dhakhso ah---** hasugin balantada dambe.

- ❖ Qandho ku haysa 3 maalmood iyo ka badan
- ❖ Cuntada oo aad cunayn, culayskaaga oo hoos u dhaca, ama aad dareemaysid daal.
- ❖ Lalabo, Matag, ama shuban.

Dadka qaarkood waxa ku dhaca lalabo aan badnayn marka ugu horaysa ay daawada **INH** qaataan. Haday adiga sidani kugu dhacdo, isku day inaad cunto cunto yar intadan qadan dawada ka hor ama qaado daawada marka aad jiiifsanaysid. **Hadii aad weli labolabonaysid kadib saxed maalmood, u wac dhakhtarkaaga si dhakhso ah.**

- ❖ Calool xanuun.
- ❖ Kaadidaada oo u ekada shaaha ama qaxwaha midabkooda
- ❖ Indhaha iyo maqaarka oo jaale ku noqda
- ❖ Jir cuncun
- ❖ Kabuubyo ama jiririco gacmaha iyo lugaha ama afka aad ka dareento
- ❖ Wareer aad wax qabsan Karin

Waxaa kaloo Muhiim ah:

- ❖ Hadaad khamri cabtid adigoo qaadanaya daawada **INH** waxa ay dhawici kartaa beerkaaga. Hacabin, beerka, wineka ama khamriga adag ilaa iyo inta aad ka dhamay sanaysid daawada **LTBI**. Hajoojin daawada adiga oo la tashan dhakhtarkaga.
- ❖ U sheeg dhakhtarkaaga hadii aad qadato daawooyin kale.
- ❖ Hadii aad uur yeelato, jooji daawada **INH** lana soo xiriir dhakhtarkaga si dhakhso ah.
- ❖ Kafogee daawooyinka aad qaadato ciyaalka iyo xawayaanka.

Maxaa igu dhici kara hadaan qaadan daawada?

Hadii aadan qadan daawada **INH** ama aad joojisid qaadashada kaniiniga waad xanuunsan kartaa, wayna soo kacaysaa qaaxada qarsoon ama jiiifta. Waxay sidani ku dhici kartaa qof kasta oo qaba **LTBI** ama qaaxada qarsoon ama jiiifta. Ha sugin intay sidani kugu dhici lahayd adiga iyo qoyskaaga! U waco dhakhtarkaaga hadii ay siyabahani kugu dhacaan.

- ❖ Qufac ka badan sadex usbuuc.
- ❖ Dhidid badan habeenkii
- ❖ Qufac dhiig wata
- ❖ Qandho

Hadii La'iga talaalay BCG?

Dalalka ay ku badan tahay qaaxadu, dad badan ayaa laga talaalay talaalka loo yaqaan BCG. BCG wuxuu difaaci karaa caruurta si ay u qaadin qaaxada, laakiin waa sanado kooban inta ay ku difaaci karto. Dadka laga talaalay BCG waxaa ku dhici karta qaaxada firfircoon, hadii lagaa talaalay BCG, wad iska difaaci kartaa qaaxada hadii aad qaadatid daawada LTBI.

Hadii aanan awoodin inaan gato daawada?

Weydiiso dhakhtarkaga ama kalkaalisada sidaad ku heli lahayd dawada qaaxada iyadoo bilaasha ah taasoo ay bixiyaan **Maine Public Health** qaybta ka hortaga qaaxada.

Hadii aan ka guuro meesha aan deganahay?

Hadaad u guurtid gobol kale ama magaalo kale, u sheeg dhakhtarkaga inta **aadan guurin ka hor**. Waxay kaa caawin karaan sidii aad u heli lahayd daawadada markaad guurto kadib.

Ka difaac Qaaxada Naftaada, Qoyskaaga iyo Saaxiibadaa. Qaado Daawadada Qaaxada oo Dhan!

Sideen u xasuusan si aan u qaato daawada qaaxada?

Waa muhiim inaad qaadata dawada INH si joogto ah.

Hadii aad qaadan daawad amaalmo badan waxba kuuma tari doonto. Hajoojin ilaa dhakhtarkaagu uu ku dhaho jooji.

Siyaabo kaa caawin kara inaad ilaawin daawada:

- ❖ Dhig daawada meel aad ka arkaysid maalin kasta.
- ❖ Weydiiso qof ehelkaga ama saaxiibkaa ah inuu ku xasuusiyo
- ❖ Calaamadso taariikhda markasta ood qaadata daawada.
- ❖ Isticmaal qalabka lagu rito kaniiga si aad u ilaawin.
- ❖ Qaado daawada maalin kasta isku wakhti, tusaale ahaan, kadib markaad cadayato, markaad quraacato ama intaadan seexan.

Hadii aad ilawdo daawada maalin, qor maalinta si aad ugu sheegto dhakhtarkaaga marka aad leedahay balan.

Kalkaalisada u shaqaysa Dadweynaha:

Telephone () _____

Jeermiska Qaaxada Qarsoon

Waxaad dareemaysaa inaad caafimaad qabto.
Uma gudbin kartid qaaxada dadka kale.
Kinii lagu siiyo ayaa kaala dagaalamaya inaad xanuusato.

Jeermiska Qaaxada firfircoon.

Waxaa laga yaabaa inaad caafimaad qabtid
Waxaad kaloo awoodaa inaad u gudbiso jeermiska qaaxada dadka kale
Kiniini ayaa kaa daaweyn kara.

Yaan Waca Hadaan ubaahdo Caawino?

**Maine Tuberculosis Control Program
Telephone: 207-287-8157**

**Maine Public Health Nursing Program
286 Water Street, 7th Floor
State House Station #11
Augusta, ME 04333-0011
Voice 287-3259 or 1-800-698-3624
TTY 1-800-606-0215
Toll Free number for Calls within Maine Only**

Waxaan u mahad celinaynaa Gobolka Minnesota Wasaarada Caafimaadka oo noo ogaaladay inaan isticmaalno hab qoraalkan oo noo naamaxay inaad qoraalkan aan qorno.

Ogaysiis aan lahayn midab kala sooc.

Qaybta u qaabilsan caafimadka dadweynaha iyo u shaqaynta dadka DHHS makala soocan dadweynaha haday noqon lahayd itaal daro, cidad tahay, midabkaaga, caqidada, lab ama dhedig, da'da, iyo meeshaad ka timid ama aad ku dhalatay, si aad u ogaato ama ay kuugu fududato hawlaha aan qabano iyo caawitaanada aan bixino, haday noqon lahay shaqaalaysiin. Ogaysiiskan wuxuu balan qaadaya inuu adkeeyo sharciga qodobka II ee maraykanka dadka italka daran ee la sameeyey 1990, iyadoo la tixraacayo xuquuqda binuadanka ee la dejiyey 1964. Qaybta 504 oo la baxnaaniyey 1973, wakhtiga midabkala sooca sharciga lagu soo rogey in la joojiyo 1975 qodobka IX. Ee lagu saxay waxbarashada



John E. Baldacci, Governor Brenda M. Harvey, Commissioner

08/2008

DAAWADA QAAXADA QARSOON



**Qaaxada Waa laga Hortegi karaa
Waa la daaweyn karaa
Waa laga daawoobaa
Qaaxada waxa kale olooyaan TB**